Warbixinta Kama dambeysta ah: Waayo-aragnimada Dugsiga sare ka dib ee Ardayda Naafada ah ee ku nool Gobolka Washington (2025-ka)

Roots of Inclusion, oo kaashanaya CoDesign Works, ayaa sameeyay ra'yi ururin dhammeystiran si loo fahmo sida waxbarashada K-12 ee Washington ay ardayda naafada ah si wanaagsan ugu diyaarin karto guusha dugsiga sare ka dib.

Wanaajinta Ku dhaqanka Loo dhan yahay

Talooyin loogu talagalay waxbarashada K-12 oo uu taageero Nidaamka Ku dhaqanka Ka mid noqoshada ee OSPI

Eegida Kala-guurka Waxbarashada

Natiijooyin muhiim ah oo ku saabsan waxyaabaha la isku sii dejiyo 'accommodations', caqabadaha iyo taageerooyinka la rabo

Fahamka Waayo-aragnimada Ardayga

Ra'yi ururin dhammeystiran ee safarka dugsiga ka dib ee ardayda naafada ah

Warbixintani waxay soo koobaysaa natiijooyinkayaga waxayna bixisaa aragtiyo la fulin karo si macallimiinta looga caawiyo in ay si wanaagsan ardayda naafada ah ugu diyaariyaan kala-guur guul leh oo ku aadan kulliyada iyo wixii ka dambeeya.

Waxa ay Ardaydu U arkeen in uu Ugu Layaab Badan yahay

Roots of Inclusion (**rootsofinclusion.org**), oo kaashanaya CoDesign Works (**codesignworks.com**), oo taageero ka helaya Nidaamka Taageerada Farsamo ee Ku dhaqanka Ka mid noqoshada ee OSPI, ayaa ra'yi ururin sameeyay Jiilaalka-Gu'ga ee 2025-ka si loo eego sida dugsiyada K-12 ee ku yaala Gobolka Washington ay ardayda naafada ah si wanaagsan ugu diyaarin karaan guusha dugsiga sare ka dib. Si gaar ah, CoDesign Works waxay ra'yi ururin ka qaaday ardayda sameysay u gudbida waxbarashada sare ee Washington si loo weydiiyo fikradahooda iyo aragtiyahooda. (Iyada oo ra'yi ururintu u furnayd ardayda qoran barnaamijyada tababarka xirfadeed, kaliya ardayda ku jirta kulliyada 2 ama 4 ah ama barnaamijyada jaamacadeed ayaa u muuqday in ay ka qayb qaataan.) Warbixintani waxay isku keenaysaa natiijooyin muhiim ah, caqabado, iyo talooyin la fulin karo, oo ay taageerayaan jawaabaha 219 arday iyo cilmi-baarista hadda jirta. Ra'yi ururintu waxay daaha ka qaaday dhowr caqabadood oo aan la filayn oo ardaydu kala kulmeen ka soo gudbitaankoodii dugsiga sare ilaa waxbarashada dugsiga sare ka dib:

Jiritaan la'aanta Taageero Marka la barbardhigo Dugsiga Sare

Arday badan ayaa la yaabtay in waxyaabaha la sii dejiyo 'accommodations' iyo adeegyada taageero ee ka jira kulliyadu aysan ahayn kuwo u firfircoon sidii ay ahaayeen dugsiga sare. Xigasho Arday: "Dugsigii sare, macallimiintayda ayaa xaqiijisay in aan helo taageeradii aan u baahnaa. Kulliyadu, waxay ahayd in aan wax kasta iskay u ogaado."

Adkaanshaha Codsiga Waxyaabaha la sii dejiyo 'Accommodations'

Ardaydu waxay u qaateen in waxyaabaha la sii dejiyo 'accommodations' ee dugsiga sare ay si toos ah u wareegi doonaan kulliyada, iyaga oo kaliya ogaaday in tahay in ay maraan nidaam rasmi ah. Xigasho Arday: "Waxaan u maleynayay in IEP-gaygu ii raaci doono uun kulliyada. Qofna iima sheegin in ay ahayd in aan dib u codsado waxyaabaha la sii dejiyo 'accommodations'."

Culayska shaqo ee Tacliimeed

Arday badan ayaan u diyaar garoobin korodhka adag ee shaqada koorsada kulliyada. Xigasho Arday: "Qiyaasta wax akhriska iyo shaqada guri ayaa naxdin lahayd. Waxay noqotay in aan barto sida aan waqtigayga ugu maareynayo si dhakhso ah."

Wacyigelinta Xaddidan ee Tiknoolajiyada La adeegsado

Ardayda qaarkood ayaa ogaaday qalabka tiknoolajiyada la adeegsado ee kulliyada ee ay jeclaan lahaayeen in mar hore la bari lahaa. Xigasho Arday: "Marnaba wax kama ogeyn nidaamka software-ka ee hadalka u beddela qoraalka ilaa iyo kulliyada maahane. Waxtar ayuu lahaan lahaa intii lagu jiray dugsigii sare."

Muhiimada in qofku Naftiisa U doodo

Ardaygu waxay ogaatay in noqotay in ay u doodaan naftooda si ka badan intii ay weligood yeesheen dugsiga sare. Xigasho Arday: "Waxay noqotay in aan barto sida loo sharraxo naafanimadayda oo aan u weydiisto caawimaad. Dugsigii sare, macallimiintayda ayaa taasi ii sameysay."

Natiijooyinkani waxay xoojinayaan baahida loo qabo barnaamijyada isku diyaarinta dugsiga sare oo xoogan oo ardayda u diyaariya xirfadaha, qalabka, iyo kalsoonida ay u baahan yihiin si ay u guuleystaan waxbarashada dugsiga sare ka dib.

Guudmarka Natiijooyinka Xiisaha leh

Ra'yi ururintu waxay daboolka ka qaaday aragtiyo dhowr ah oo soo jiidasho leh oo ku saabsan waayo-aragnimada ardayda naafada ah ee u gudbaysa waxbarashada dugsiga sare ka dib. Waxyaabaha muhiimka ah qaarkood ee meesha ka soo baxay waxaa ka mid ah:

Muhiimada in qofku Naftiisa U doodo

Arday badan ayaa dareentay in aysan u diyaarsanayn in ay u doodaan waxyaabahooda la isku sii dejiyo 'accommodations' iyo baahidooda taageero. Waxay carabka ku adkeeyeen in barashada sida loo helo adeegyada naafada iyo in ay waqti sii horeeya xiriir ka sameeyaan baahiyahoodu ay isbeddel la taaban karo keeni lahayd. Xigasho Arday: "Ma aan ogeyn xataa in ay ahayd in aan codsado aniga naftaydu waxyaabaha la sii dejiyo 'accommodations' kulliyada gudaheeda. Waxaan u maleynayay in ay si toos ah ugu wareegi doonaan sida dugsiga sare oo kale."

Caqabadaha ka jira Maareynta Waqtiga

Qayb weyn oo ka mid ah ardayda ayaa dhibaato ku qabtay in ay si hufan u maareeyaan waqtigooda kulliyada gudaheeda. Dugsigii sare uma diyaarin iyaga heerka madax banaani iyo anshaxa-shakhsi ee loo baahnaa. Xigasho Arday: "Dugsigii sare, macallimiintayda ayaa i xasuusisay hawlaha shaqo. Kulliyadu, waxay ahayd in aan dhammaantood iskay u ogaado, runtiina waan ku dhibtooday."

Kala duwanaanshaha ka jira Qorsheynta Kala-guurka

Ardaydu waxay soo sheegtay in qorshayaasha kala-guurka ee dugsigoodii sare uusan inta badan lahayn u diyaar garow macno leh oo loogu talagalay kulliyada, isaga oo inta badan diiradda saaraya u hoggaansanaanta marka loo eego diyaar garowga la taaban karo. Xigasho Arday: "Qorshahaygii kala-guurku wuxuu ka hadlay oo kaliya macluumaad aasaasiga ah. Qofna dhab ahaantii igama caawin ku tababarashada in aan u doodo naftayda ama fahamka waxay ahayd taageerada la heli karay."

Baahida loo qabo Soo bandhigida Tiknoolajiyada La adeegsado

Arday badan ayaa kaliya wax ka ogaaday tiknoolajiyada la adeegsado ee waxtarka leh ka dib markii ay bilaabeen kulliyada, taasi oo kala-guurkooda ka dhigaysa mid ka adag intii loo baahnaa. Xigasho Arday: "Weligay nidaamka software-ka ee qoraalka u beddela hadalka kuma isticmaalin dugsigii sare, laakiin kulliyada, wuxuu noqday mid lagama maarmaan ah. Waa maxay sababta qofna waqti hore iigu soo bandhigi waayay?"

Natiijooyinkani waxay xoojinayaan baahida loo qabo barnaamijyada isku diyaarinta dugsiga sare oo xoogan oo ardayda u diyaariya xirfadaha, qalabka, iyo kalsoonida ay u baahan yihiin si ay u guuleystaan waxbarashada dugsiga sare ka dib.

Kala duwanaanshaha Da'da, Jinsiyada, Nooca Naafanimo, iyo Jinsiga

Kala duwanaanshaha Da'da

- Ardayda yar yar (18-22) ayay u badnayn in ay dhibaato ku qabaan maareynta waqtiga iyo barashada madaxa banaan
- Ardayda waaweyn (23+) waxay soo sheegeen caqabadaha dhanka helitaanka iyo caqabadaha dhaqaale in ay yihiin dhibaatooyin waaweyn

Xigasho Arday: "Kulliyadu waxay ahayd mid naxdin leh dugsigii sare ka dib. Si lama filaan ah, ma jirin qof i soo hubinayay, waxayna noqotay in aan aniga naftaydu wax kasta maareeyo."

Xigasho Arday: "Arday weyn ahaan, waxay noqotay in aan la tacaalo shaqada, qoyska, iyo dugsiga, mana garanayn meel aan u jeesto si aan u helo taageerada naafada."

Kala duwanaanshaha Nooca Naafanimada

- Ardayda qabta naafanimada dhanka waxbarashada ayaa ahaa kooxda ugu weyn ee hesha waxyaabaha la sii dejiyo 'accommodations' ee dhanka imtixaanka balse waxay ahaayeen kuwa ugu badan tahay ee soo sheega in ay dhib ku qabaan in qofku naftiisa u doodo
- Ardayda qabta naafanimada nafsiyeed ama caafimaadka maskaxda ayaa soo sheegay waqtiyada wax la sugayo oo dheer adeegyada naafada
- Ardayda qabta naafanimada jireed ayaa la kulantay caqabadaha gelitaanka jireed

Xigasho Arday: "Waxaan xaq u yeeshay waqtiga imtixaanka oo muddadiisa la kordhiyay, laakiin ma garanayn in aan ku codsado kulliyada gudaheeda. Qofna iima sharrixin nidaamka."

Kala duwanaanshaha Jinsiyadeed

- Ardayga caddaanka ah ayaa ahaa kuwa ugu badan ee soo sheega in ay waxyaabaha la sii dejiyo 'accommodations' ku helaan kulliyada
- Ardayda Madow iyo Latino ayaysan u badnayn in ay soo sheegaan in ay helaan waxyaabaha la sii dejiyo 'accommodations', inkasta oo la aqoonsaday in ay leeyihiin naafanimo la mid ah
- Ardayda jinsiyada badan leh iyo kuwa Dhulka loogu yimid 'Indigenous' ayaa soo sheegay caqabado dheeraad ah oo ah maareynta adeegyada naafada ee dugsiga sare ka dib

Xigasho Arday: "Ma aan ogeyn xataa in aan xaq u lahaa in aan codsado waxyaabaha la sii dejiyo 'accommodations' kulliyada gudaheeda. Waxaan u qaatay in ay kaliyaha ahayd in aan wax iskay u ogaado."

Kala duwanaanshaha Jinsi

- Ardayda Labka/Ragga ah ayaysan u badnayn in raadsadaan adeegyada taageerada naafada, xataa marka ay soo sheegaan caqabado jira
- Ardayda Dheddiga/Dumarka ayaa ahaa kuwo aad ugu firfircoon dhanka codsashada waxyaabaha la sii dejiyo 'accommodations'
- Ardayda aan jinsiyad gaar ah lahayn 'non-binary' ayay u badnayn in ay dareemaan go'doonsanaan iyada oo sababtu tahay jiritaan la'aanta naafanimo loo dhan yahay iyo goobaha LGBTQ+

Xigasho Arday: "Waan ka fogaaday in aan aado adeegyada naafada markii u horreysay sababta oo ah ma rabin in la ii arko in aan 'u baahanayo caawimaad.' Laakiin waxaan ku dambeeyay in aad dib uga dhaco sababtaasi darteed."

Qaab-dhismeedka Arday

> Jawaab bixiyayaasha ra'yi ururinta ayaa u badnaa caddaan (76%), da'doodu tahay 18-22 (71%), waxayna isku aqoonsadeen in ay yihiin lab/rag (60%). Daraasada waxaa ka mid ahaa ka qayb qaatayaal kala duwan oo guud ahaan leh kooxo da'eed, taariikh jinsiyadeed, iyo aqoonsiyada jinsi ahaaneed.

Ra'yi ururintu waxay isku soo ururisay jawaabo laga helay arday guud ahaan ka soo jeeda kooxo da'eed oo kala duwan, taariikh jinsiyadeed iyo qowmiyaddeed, iyo aqoonsiyada jinsi ahaaneed. Hoosta waxaa ku qoran guudmarka qaab-dhismeedka jawaab bixiyayaasha:

71%
18-22 Sano
131 jawaab bixiyayaal

17%
23-27 Sano
31 jawaab bixiyayaal

10%
28-35 Sano
18 jawaab bixiyayaal

2%
36+ Sano
4 jawaab bixiyayaal

Aqoonsiga Jinsi ahaaneed

60%
Lab/Rag
130 jawaab bixiyayaal

32%
Dheddig/Dumar
70 jawaab bixiyayaal

5%
Aan jinsiyad gaar ah lahayn 'non-binary'
10 jawaab bixiyayaal

3%
Waxaan doorbidayaa in aanan sheegin
8 jawaab bixiyayaal

Aqoonsiga Jinsiyadeed & Qowmiyaddeed

76%
Caddaan ah
172 jawaab bixiyayaal

7%
Madow ama Maraykanka Madow ah
15 jawaab bixiyayaal

17%
Jinsiyado Badan leh & Kooxo Kale
28 jawaab bixiyayaal

Qaybta Jinsiyado Badan leh & Kooxo Kale waxaa ka mid ah:

- Jinsiyado Badan leh: 12
- Dadka dhaladka ah ama dadka Dhulka loogu yimid 'Indigenous': 8
- Ka soo jeeda Bariga Dhexe ama Ka soo jeeda Waqooyiga Afrika: 3
- Laatiino/Hisbaanik: 2
- Aasiya ka soo jeeda: 2
- Jasiiraddaha Baasifiga: 1

U qaybsanaanta Juqraafi ee Jawaab bixiyayaasha

Qiyaasta boqolkiiba ee Jawaab bixiyayaasha iyada oo la eegayo Degaan Juqraafi ahaaneed



U qaybsanaanta Degaanka

Ra'yi ururintii waxay muujisay sida ay juqraafi ahaan u qaybsan yihiin jawaab bixiyayaasha Gobolka Washington. Aqlabiyad ahaan ka qayb qaatayaasha ayaa ka socday degaannada ugu dadka badan:

Degaanka	Qiyaasta boqolkiiba ee Jawaab bixiyayaasha
Degaanka King	40%
Degaanka Pierce	25%
Degaanka Snohomish	15%
Degaanka Spokane	10%
Degaanka Clark	5%
Kuwo kale	5%

Sida ay u qaybsan yihiin ayaa guud ahaan ka tarjumaysa cufnaanta dadkuna Gobolka Washington, iyada oo inta badan jawaab bixiyayaashu ay ka socdeen gobolka Puget Sound.

Noocyada Naafanimada ee ay Soo sheegeen Ardaydu

Taariikhda Taageerada K-12: Boqolkii lixdan jawaab bixiyayaasha ayaa helay waxbarasho gaar ah oo lahaa IEP dugsigii sare, iyada 25% ay lahaayeen Qorshaha 504. Boqolkiiba shan iyo toban ma aysan haysan midkoodna dugsigii sare laakiin waxay isku aqoonsadeen in ay yihiin arday naafo ah.

Ra'yi ururintu waxay isku soo ururisay macluumaad ku saabsan nooca naafanimo ee ay aqoonsadeen jawaab bixiyayaashu. Guud ahaan 371 jawaabood ayaa la diiwaan la geliyay oo ka socday ardayda isku aqoonsaday in ay leeyihiin mid ama ka badan oo naafanimo ah. Hoosta waxaa ku qoran guudmarka:

Nooca Naafanimada	Tirada Jawaab bixiyayaasha
Naafanimada jireed	25
Naafanimada dareenka	18
Naafanimada dhanka garaadka ama waxbarashada	45
Naafanimada korriinka	30
Naafanimada wada xiriirka	12
Naafanimada nafsiyeed ama caafimaadka maskaxda	50
Xanuun soo jireen ah	22
Waxaan doorbidayaa in aanan sheegin	10
Kuwo kale	8

Isku dhafka Naafanimada Caamka ah

Arday badan ayaa loo aqoonsaday in ay leeyihiin wax ka badan hal naafanimo. Isku dhafka naafanimada caamka ah ee ugu badan ee la soo sheegay waxaa ka mid ah:

Naafanimada dhanka garaadka ama waxbarashada + Naafanimada jireed

35 Jawaab bixiyayaal

Naafanimada korriinka + Naafanimada dhanka garaadka ama waxbarashada

28 Jawaab bixiyayaal

Naafanimada jireed + Xanuun soo jireen ah

22 Jawaab bixiyayaal

Naafanimada jireed + Naafanimada wada xiriirka

15 Jawaab bixiyayaal

Naafanimada dareenka + Naafanimada jireed

18 Jawaab bixiyayaal

Isku dhafkani ayaa muujinayaa xaalada adag ee naafanimada iyo baahida loo qabo nidaamyada taageero oo dhammeystiran oo si isku mar ah wax uga qabta baahiyaha.

Waxyaabaha la sii dejiyo ‘accommodations’ ee La helay Waxbarashada Dugsiga sare ka dib

Jawaab bixiyayaasha ra’yi ururinta ayaa soo sheegay in ay waxyaabaha la sii dejiyo ‘accommodations’ oo kala duwan ay ku helaan hay’adahooga waxbarasho ee hadda jira. Waxyaabaha la sii dejiyo ‘accommodations’ ee inta badan sida joogtada ah loo soo sheegay waxaa ka mid ah:

102

Waxyaabaha la sii dejiyo ‘Accommodations’ ee Imtixaanka-La xiriira

Muddo lagu kordhiyo imtixaanada, jawi imtixaan oo ka xor ah mashquulin, iyo qaabab beddel ah oo loogu talagalay qiimeynta

85

Tiknoolajiyada La adeegsado

Akhriyayaasha shaashada, nidaamka software-ka ee hadalka u beddela qoraalka, iyo keyboard-yada lala qabsan karo

76

Hababka Waxbarasho ee Beddelka ah

Dabacsanaanta qaababka waxbarid, helitaanka casharro la duubay, iyo siyaabo kale oo lagu soo bandhigo aqoon

64

Helitaanka Waxyaabo u qoran Qaabab Beddel ah

Buugaagta waxbarashada oo dhijital ah, buugaagta cajalad ahaanta loo dhageysto, iyo helitaanka waxyaabaha dhanka waxbarashada oo kale

Xigasho Arday: “Waxaan uga mahad celiyey tiknoolajiyada la adeegsado iyo waqtiga dheeraadka ah ee imtixaanka, laakiin waxaan rajeyn lahaa in aan baran lahaa sida loogu doodo iyaga dugsigii sare.”

Caqabadaha ka jira Ka soo gudbida Dugsiga Sare ilaa Kulliyada

Ardaydu waxay dhibaatooyin dhowr ah kala kulmeen ka soo gudbitaankoodii dugsiga sare ilaa waxbarashada dugsiga sare ka dib. Mawduucyada caamka waxaa ka mid:

Maareynta Waqtiga

Arday badan ayaa dhibaato ku qabtay isku dheelitirka shaqada koorsada, hawlaha manhajka dheeraad ah, iyo mas'uuliyadaha shakhsi ahaaneed. Madax bannaanida la sii kordhiyay ee looga baahan yahay kulliyadu waxay ahayd isbeddel la taaban karo.

Xigasho Arday: "Macallimiinta kulliyadu waxay kaa filayaan in aad ogaato sida aad u maareynayso waqtigaaga, laakiin qofna ima barin sida. Waxaan dareemay in hawshu iga tiro badatay oo la qabsado iyada."

Tacliin Adag

Wax weydiinta la sii kordhiyay ee shaqada koorsada ee kulliyada ayaa la yaab ku noqday ardayda qaarkood, iyaga oo ogaaday in ay adag tahay in lala qabsado xawaaraha degdega ah iyo rajooyinka sare ee jira.

Jiritaan la'aanta Xirfadaha in qofku Naftiisa U doodo

Arday badan ayaa dareentay in aysan u diyaarsanayn in ay u doodaan waxyaabahooda la isku sii dejiyo 'accommodations' iyo baahidooda taageero. Qaar ayay ku adkayd in ay maareeyaan adeegyada naafada oo fahmaan xuquuqdooda.

Xigasho Arday: "Waxaan jeclaan lahaa in uu qof iga caawiyay ku tababarashada in qofku naftiisa u doodo kulliyada ka hor. Ma garanayn sida loo codsado waxyaabaha la sii dejiyo 'accommodations' iyo ama xitaa cidda ay tahay in aan la hadlo."

Caqabadaha Dhanka Helitaanka

Ardayda qaarkood ayaa caqabado kala kulantay helitaanka adeegyada taageerada naafada, oo ay ku jiraan waqtiyada wax la sugayo oo dheer, siyaasado aan caddeyn, iyo jiritaan la'aanta xiriir firfircoon oo ka yimaada hay'adaha.

Caqabadaha Bulsho iyo Niyadeed

Arday badan ayaa la kulantay go'doonsanaan ama dhibaato ay ku qabaan in ay sameeyaan xiriir iyada oo sababtu tahay jiritaan la'aanta meelo loo dhan yahay ama nidaamka taageerada dadka isku faca ah.

Xigasho Arday: "Way adkayd in la helo jaaliyad arday oo sidayda oo kale ah. Waxaan inta badan kelinimo ku dareemay maareynta tacliimeed iyo taageerada naafada labadoodaba."

Taageerooyinka Ardaydu Jeclaan lahayd In ay Ku heli lahaayeen Dugsigii Sare

Jawaab bixiyayaasha ayaa aqoonsaday dhowr meelood halkaasi oo dugsiyada sare ay si wanaagsan u diyaarin lahaayeen iyaga, oo ay ka mid yihiin:



> Xigasho Arday: “Waxaan jeclaan lahaa in qof i baray sida loo maareeyo jadwalkayga oo caawimaad u weydiisto intii aanan tagin kulliyada ka hor. Waxay ahayd wax adag in la barto.”

> Xigasho Arday: “Dugsigii sare, marnaba may noqon in aan u doodo naftayda sababta oo ah macallimiintayda ayaa ii maareeyay waxyaabaha la sii dejiyo ‘accommodations’. Kulliyada, wax fikrad ah kama haysan halka wax laga bilaabayo.”

Eegida Faahfaahsan ee la eegayo Taageerooyinka La rabo

Tababarka in qofku Naftiisa U doodo

Arday badan ayaa rajeeyay in la baray sidii ay si hufan ugu doodi lahaayeen baahiyahooda, la xiriirka macallimiinta, iyo maareynta adeegyada taageerada naafada ee kulliyada.

> Xigasho Arday: "Wax fikrad ah kama haysan sida loogu doodo naftayda kulliyada. Haddii aan baran lahaa sida loola hadlo macallimiinta kulliyada oo waqti sii horeeya loo codsado waxyaabaha la sii dejiyo 'accommodations', waxaan yeelan lahaa kalsooni badan."

Tilmaamaha Maareynta Waqtiga iyo Habeynta

Maareynta shaqada koorsada, waqtiyada la qabtay, iyo waxbarashada madaxa banaan ayaa caqabad weyn ku ahaa ardayda aanan xirfadahani lagu barin dugsigii sare.

> Xigasho Arday: "Macallimiinta kulliyadu waxay kaa filayaan in aad horeba u taqaanay sida loo sii ahaado qof abaabulan oo loo maareeyo waqtiga la qabto. Waxaan badan ayaan dhibaatooday sababta oo ah marnaba ma aysan noqon in aan taasi sameeyo dugsigii sare."

Soo bandhigida Tiknoolajiyada La adeegsado ee Weyn

Ardayda qaarkood ayaan ka warqabin tiknoolajiyada la heli karo si ay u taageerto waxbarashadooda, sida akhriyayaasha shaashada, app-ka qaadashada qoraalka, iyo nidaamka software-ka ee hadalka u beddela qoraalka.

> Xigasho Arday: "Ma aan ogeyn xataa in ay jirtay tiknoolajiyada la adeegsadaa ilaa aan ka soo gaaray kulliyada. Haddii aan wax ka baran lahaa waqti sii horeeya, waxaan yeelan lahaa waqti fudud oo la xiriira fasalladayda."

Qorsheynta Kala-guurka oo Wanaagsan ee Qorshayaasha IEP iyo 504

Ardayda qaarkood ayaa dareemay in ay qorsheyntooda kala-guurku ay ahayd mid aan ku filnayn, sii buuxdana uguma diyaar garoobin kala duwanaanshaha u dhexeeya waxyaabaha la sii dejiyo 'accommodations' ee dugsiga sare iyo kulliyada.

> Xigasho Arday: "Qorshahaygii kala-guurku run ahaantii iima diyaarin waxa ay kulliyadu dhabtii noqon doonto. Laakiin waxaan rajeyn lahaa in aan ku sii tababaran lahaa madax banaanida iyo in qofku naftiisa u doodo qalin-jabintii ka hor."

"Wax fikrad ah kama haysan halka wax laga bilaabayo." Haddii qof waqti sii horeeya igu xiri lahaa hay'adaha dadka weyn, ma aan dareemeen in aan aad u lunsanahay."

Ardaydu way ka faa'iidaystaan marka kooxda IEP ay fududeyso isku xirka hore ee lala leeyahay hay'adaha sida:

- **Qaybta Tababarka Dhaqancelinta (DVR)** ee loogu talagalay adeegyada la xiriira shaqada.
- **Maamulka Naafanimada Korriinka (DDA)** ee loogu talagalay taageerada muddada fog.
- **Kulliyadaha iyo jaamacadaha, oo ay ka mid yihiin kulliyadaha bulshada iyo dugsiyada tababarka,** si wax looga ogaado bixinta adeegyada naafada.
- **Bixiyayaasha tiknoolajiyada la adeegsado, sida kuwa kooxahaasi ku qoran website-ka DSHS: https://www.dshs.wa.gov/dvr/assistive-technology-services**

Waxa Cilmi-baaristu Sheegayso

Daraasadihii ugu dambeeyay ayaa iftiimiyay arrimaha muhiimka ee saameynta ku yeelanaya guusha dugsiga sare ka dib ee ardayda naafada ah. Cilmi-baaristu waxay hoosta ka xariiqaysaa muhiimada in qofku naftiisa u dodo, helitaanka tiknoolajiyada la adeegsado, xirfadaha shaqeynaya oo sare, iyo qorsheynta kala-guurka oo wax ku ool ah in ay yihiin kuwo muhiim ah oo go'aamiya fududeynta ka soo gudbida dugsiga sare ilaa kulliyada.

In qofku Naftiisa U doodo iyo Qorsheynta Kala-guurka

Daraasadu waxay muujisay in ardayda naafada ah ay inta badan dhibaato ku qabaan in ay naftooda u doodaan marka la joogo goobaha dugsiga sare ka dib iyada oo sababtu tahay diyaar garow aan ku filnayn oo dugsigii sare ah. Daraasad ka socotay Journal of Postsecondary Education and Disability (Dong et al., 2024) ayaa lagu ogaaday in ardayda yeelatay tababar cad oo ah in qofku naftiisa u doodo dugsigii sare ay soo sheegeen kalsooni sare oo la taaban karo oo ah codsashada waxyaabaha la sii dejiyo 'accommodations' iyo maareynta adeegyada naafada ee kulliyada.

Isticmaalka Tiknoolajiyada La adeegsado

Cilmi-baaris ka socotay International Journal of Environmental Research and Public Health ayaa soo jeedisay in isku soo bandhiga waqtiga hore ee tiknoolajiyada la adeegsado, sida nidaamka software-ka ee qoraalka u beddela hadalka iyo ka hadalka u beddela qoraalka, ay wanaajiso natiijooyinka waxbarashada ee ardayda naafafada ah isaga oo kordhinaya helitaanka iyo madax banaanida.

Caqabadaha Hay'adeed iyo Taageerada Kulliyada

Natiijooyin ka soo baxay U.S. Government Accountability Office (GAO) ee warbixintii (2024) ayaa muujinaya caqabado jira oo la xiriira caga jiidka kulliyada waxbarasho ee in ay hirgeliso waxyaabaha la sii dejiyo 'accommodations' iyo siyaasadaha hay'adeed oo helitaanka taageero ka dhiga mid adag. GAO waxay ku talinaysaa tababarka macallimiinta oo la kordhiyo iyo dib u habeyn hay'adeed si loo fududeeyo nidaamka waxyaabo la isku sii dejiyo 'accommodation'.

Taageerada Dadka isku faca ah iyo Jawi Loo dhan yahay

Daraasada ayaa carabka ku adkeysay baahida loo qabo nidaamka taageerada dadka isku faca ah oo loo dhan yahay. Cilmi-baaris uu sameeyay Lipka et al. (2020) ayaa lagu ogaaday in ardayda naafada ah ee ku lug yeelatay ururada ardayda ee la xiriira naafada iyo barnaamijyada la talinta dadka isku faca ah ay soo sheegtay isdhexgalka bulshada iyo heerarka sii joogista kulliyada oo sarreeya.

Talooyin loogu talagalay Dugsiga K-12

Iyada oo ku saleysan natiijooyin, waxaan ku talinaynaa in hay'adaha waxbarasho ee K-12 ay qaadaan tallaabooyinka soo socda si ay u wanaajiyaan diyaarsanaanta dugsiga sare ka dib ee ardayda naafada ah:



In la ballaariyo Tababarka in qofku Naftiisa u Doodo

In xirfadaha in qofku naftiisa u doodo lagu dhafo manhajka

In la kordhiyo Soo bandhigida Tiknoolajiyada La adeegsado

In la bixiyo fursado lagu barto oo lagu tababarto adeegsiga qalabka

In la isbaro Xirfadaha Shaqeynaya oo Sare

In la Maamulo maareynta waqtiga iyo habeynta

In la xoojiyo Qorsheynta Kala-guurka

In lagu daro qorsheyn cad oo loogu talagalay guusha dugsiga sare ka dib

In la wanaajiyo Helitaanka iyo Ka mid noqoshada

In la abuuro jawi shabahaya goobaha dugsiga sare ka dib

Tallooyinkani waxay si toos ah ugu ku saleysan yihiin jawaab celinta ardayga iyo natiijooyinka cilmi-baarista, wax ka qabashada farqiga ugu weyn ee la taaban karo ee ka jira hab-dhaqanka kala-guurka hadda jira.

Ballaarinta Tababarka in qofku Naftiisa u Doodo

Dugsiyada waa in ay xirfadaha in qofku naftiisa u doodo ku dhafaan manhajkooda, iyaga oo hubinaya in ardaydu fahamsan tahay xuquuqdooda marka loo eego sharciyada naafada oo ku qalabaysan yihiin in ay si hufan u codsadaan waxyaabaha la sii dejiyo ‘accommodations’. Tani waa in ay ku jiraan tababaro door la ciyaarayo, la talinta dadka isku faca ah, iyo maamulka maareynta adeegyada naafada ee dugsiga sare ka dib.

Fahamka Naafanimadaada

Ardaydu waa in ay awoodaan in ay sharraxaan naafanimadooda, sida ay u saameyso waxbarashadooda, iyo waxa ay yihiin waxyaabaha la sii dejiyo ‘accommodations’ ee ka caawiya in ay guuleystaan.

Ogow Xuquuqdaada

Ardaydu waa in ay fahantaa sharciyada naafada sida ADA iyo Qaybta 504, iyo sida sharciyadani u khuseeyaan goobaha waxbarashada.

Ku tababarashada Wada xiriirka

Ardaydu waa in ay ku tababarataa in ay baahiyahooda u sharraxaan macallimiinta, maamulayaasha, iyo dadka ay isku faca yihiin iyaga oo adeegsanaya door la ciyaarayo iyo dhacdooyinka dunida dhabta ah.

Maareynta Nidaamyada Taageero

Ardaydu waa in ay bartaan sida loo aqoonsado oo adeegyada taageero looga helo kulliyadaha iyo jaamacadaha.

Xigasho Arday: “Wax fikrad ah kama haysan sida loogu doodo naftayda kulliyada. Haddii aan baran lahaa sida loola hadlo macallimiinta kulliyada iyo in mar hore la codsado waxyaabaha la sii dejiyo ‘accommodations’, waxaan yeelan lahaa kalsooni badan.”



Kordhinta Soo bandhigida Tiknoolajiyada La adeegsado



Nidaamka Software-ka ee Qoraalka U beddela Hadalka

Barnaamijyo qoraalka dhijitalka ah u beddela erayo lagu hadlo, oo caawinaya ardayda qabta dhibaatooyinka wax akhriska ama helitaanka waxyaabaha naafanimada dhanka aragga oo qoran.



Qalabka Hadalka U Beddela Qoraalka

Nidaamyo erayada lagu hadlo u beddela qoraalka dhijitalka ah, oo caawinaya ardayda qabta dhibaatooyinka qoraalka ama naafanimada jireed.



Nidaamka Qaadashada Qoraalka

Qalabka dhijitalka ah oo ardayda ka caawiya isku habeynta macluumaadka, duubista casharrada, iyo qaabeynta fikirkooda oo ah qaabab la heli karo.

Dugsiyada sare waa in ay ardayda siiyaan fursado ay ku bartaan oo ku tababartaan adeegsiga qalabka tiknoolajiyada la adeegsado oo ay dhici karto in ay kula kulmaan kulliyada. Dugsiyadu waa in ay sidoo kale hubiyaan in macallimiinta loo tababaray tiknoolajiyadahani si ay si hufan ugu taageeri karaan ardayda.

> Xigasho Arday: “Waan ku dhibaatooday sanadkaygii ugu horreeyay ee kulliyadda sababta oo ah aqoon uma lahayn farsamada i caawin karaysay. Dugsigii sare waligiis marnaba ima barin qalabkani.”

Barista Xirfadaha Shaqeynaya oo Sare



Dugsiyadu waa in ay bixiyaan maamulka maareynta waqtiga iyo habeynta, iyo xeelado waxbarasho oo ardayda loogu diyaariyo dalabaadka madaxa banaan ee kulliyada. Barista ardayda ee sida loo isticmaalo qorshe dejiyayaasha, in hawlaha shaqo loo kala saaro tallaabooyin la maareyn karo, iyo abuurista caadooyin waxbarasho oo waxtar leh waxay isbeddel la taaban karo u keeni kartaa guushooda dugsiga sare ka dib.

Xirfadaha Shaqeynaya oo Sare ee Muhiimka ah ee ay tahay In la baro:

- Maareynta waqtiga iyo muhiimadsiinta
- Bilaabida iyo dhammeystirka hawsha
- Habeynta xogta iyo macluumaadka
- Qorsheynta iyo dejinta hadafka
- Is-kormeerida qofka iyo milicsiga
- Raadinta taageero nafsiyeed iyo yareynta culeyska

> Xigasho Arday: “Kulliyadu waxay ahayd mid hawshu iga tiro badatay sababta oo ah marnaba ma baran sida loo maareeyo waqtigayga. Waxaan rajeyn lahaa in aan la i siin lahaa mas’uuliyada dheeraad ah dugsigii sare si aan ugu tababarto xirfadahan.”

Xoojinta Qorsheynta Kala-guurka

IEP iyo Qorshaha 504 ee adeegyada kala-guurka waa in lagu daraa qorsheyn cad oo loogu talagalay guusha dugsiga sare ka dib, oo ay ku jiraan iskaashi kulliyadaha iyo jaamacad lagala yeesho sidii ay u fududeyn lahaayeen kala-guurka. Dugsiyadu waa inay qabtaan kulamo macluumaad halkaasi oo ardaydu ay la kulmi karto isku-duwayaasha adeega naafada oo ka socda kulliyada degaanka oo u fahmaan kala duwanaanshaha u dhexeeya K-12 iyo waxyaabaha la sii dejiyo 'accommodations' ee dugsiga sare ka dib.

1

Sanadaha Koowaad iyo Labaad ee Kulliyada

Bilow ka hadalka hadafka dugsiga sare ka dib iyo sahaminta adeegyada naafada ee kulliyada

2

Sanadaha Labaad iyo Saddexaad ee Kulliyada

Booqo xarumaha kulliyada oo la kulan xafiisyada adeegyada naafada. Bilow ku tababarashada xirfadaha in qofku naftiisa u doodo oo baro nidaamyada codsi ee waxyaabaha la sii dejiyo 'accommodation'.

3

Gu'ga Sanadka Saddexaad/Dayrta Sanadka U dambeeya

Isku soo ururso dokumentiyada looga baahan yahay waxyaabaha la sii dejiyo 'accommodations' ee kulliyada. Ku xirnow kooxaha isku faca la yahay ee naafada ah ee jooga xarumaha, haddii ay suurtagal tahay.

4

Gu'ga Sanadka U dambeeya

Sii wad ku tababarashada xirfadaha in qofku naftiisa u doodo iyo in aad wax ka ogaato nidaamyada codsi ee waxyaabaha la sii dejiyo 'accommodation'

5

Xagaaga Kulliyada Ka hor

Ku xirnow adeegyada naafada ee kulliyada oo sameyso waxyaabaha la sii dejiyo 'accommodations'

> Xigasho Arday: "Qorshahaygii kala-guurku wuxuu kaliya iska calaamadeeyay sanduuqyo 'checked boxes'. Waxaan jeclaan lahaa in qof ii sharxi lahaa waxa la filayo iyo sida loo diyaariyo."

Wanaajinta Helitaanka iyo Ka mid noqoshada

Dugsiyadu waa in ay abuuraan jawi halkaasi oo ardayda naafada ah ay ku tababaran karaan in qofku naftiisa u doodo oo la kulmaan waxbarasho loo dhan yahay oo shabahaysa goobaha dugsiga sare ka dib. Tani waxaa ka mid ah qorshe caalami oo waxbarasho (UDL) mabaa'dii, qaabab waxbarasho oo dabacsan, wada shaqeyn fiican oo u dhaxaysa waxbarashada gaarka ah iyo macallimiinta waxbarashada guud.

Qorshe Caalami oo Waxbarasho

Hirgelinta mabaa'diida UDL oo bixiya habab badan oo hawlgelin, matalaad, iyo ficil/muujin si loo daboolo baahiyaha waxbarasho ee kala duwan.

Ku dhaqanka Fasalka oo Loo dhan yahay

U tababarka dhammaan macallimiinta ee ku dhaqan loo dhan yahay oo u faa'iideeya ardayda naafada ah iyo kuwa aan ahayn naafada, jawi waxbarasho oo la aqbali karo oo taageero leh.

Qaabab Waxbarasho oo Wada shaqeyn leh

Dhiirigelinta wada shaqeyn u dhaxaysa waxbarashada gaarka ah iyo macallimiinta waxbarashada guud si loo xaqiijiyo taageero joogto ah iyo waxyaabaha la sii dejiyo 'accommodations' ee fasallada oo dhan.

Kulamada IEP ee Ardaydu Hoggaaminayso

Ku dhiirigelinta ardayda ee in ay hoggaamiyaan kulamadooda gaarka ee IEP iyaga oo ku tababaranaya in qofku naftiisa u doodo ee la joogo jawi taageero kulliyada ka hor.

Xigasho Arday: "Marnaba ma dareemin in aan ka tirsanahay dugsigii sare, taasina waxay adkeysay in aan la qabsado kulliyada. Ardaydu waxay u baahan tahay in wax badan sameeyaan si ardayda naafada ah looga dhigo in ay dareemaan in ay wax ka tirsan yihiin oo la qiimeeyo."

Gunaanadka

Ra'yi ururintani waxay hoosta ka xariiqaysaa baahida loo qabo nidaamyada taageero oo awood leh ee waxbarashada K-12 si ardayda naafada ah looga caawiyo maareynta in ay si guul ah ugu gudbaan kulliyada. In la hirgeliyo talooyinka ee kor ku xusan, dugsiyada Washington waxay dhiirigelin karaan ka mid noqoshada, sinnaanaha, iyo diyaarsanaanta ardayda naafada, iyo ugu dambeyntii wanaajinta waxbarashadooda iyo natiijooyinka xirfada shaqo.

In wax laga qabto meelahan muhiimka ah, dugsiyadu waxay ardayda naafada ah si wanaagsan ugu diyaarin karaan caqabadaha iyo fursada waxbarashada dugsiga sare ka dib, iyaga oo ka caawinaya inay gaaraan awoodooda uu buuxda oo aragtidooda gaar ah iyo kartidooda ku biiriyaan bulshada.

Tixraacyada

Ilaha soo socda ayaa dadka ku wargeliyay natiijada warbixintan iyo talooyinka. Dhammaan tixraacyadu waxay ku qoran yihiin Ingiriisi.

Borrego, M., Chasen, A., Tripp, H. C., Landgren, E., & Koolman, E. (2025). A scoping review on U.S. undergraduate students with disabilities in STEM courses and STEM majors. International Journal of STEM Education, 12(2).

Center for Change in Transition Services. (n.d.). Transition planning resources. Seattle University.

Dong, S., et al. (2024). Self-advocacy and postsecondary success for students with disabilities. Journal of Postsecondary Education and Disability.

DiversityForAll. (2024, June 2). Inclusive education programs: Best practices and case studies.

Hoteit, L., Bejarano, F., Figuerola, S., & Herranz, A. (2022, December 7). Inclusive education for students with disabilities: What a multicountry study reveals about K–12 education models. Boston Consulting Group.

International Journal of Environmental Research and Public Health. (2023). Assistive technology and academic performance for students with disabilities.

Lipka, O., et al. (2020). The role of peer support in postsecondary retention for students with disabilities. Frontiers in Psychology. Magrid Education. (2024, October 26). Implementing evidence-based practices in special education.

Monahan, J., Lombardi, A., & Madaus, J. (2018). Promoting college and career readiness: Practical strategies for the classroom. Teaching Exceptional Children, 49(6), 448–462.

Office of Superintendent of Public Instruction (OSPI). (2023). Secondary transition services and supports: Best practices for IEP transition plans in Washington State.

Parekh, G. (2023). Applied quantitative inquiry through a critical disability studies lens. In M. K. McArthur, J. A. Schaffer, & L. R. L. Thomas (Eds.), Handbook of Critical Education Research (pp. 345–360).

Paul, T., Di Rezze, B., Rosenbaum, P., Cahill, P., Jiang, A., Kim, E., & Campbell, W. (2022). Perspectives of children and youth with disabilities and special needs regarding their experiences in inclusive education: A meta-aggregative review. Frontiers in Education, 7.

Toutain, C. (2019). Barriers to accommodations for students with disabilities in higher education: A literature review. Journal of Postsecondary Education and Disability, 32(3), 297–310.

United States Government Accountability Office (GAO). (2024). Higher education: Education could improve information on accommodations for students with disabilities.

U.S. Department of Education, Office for Civil Rights. (2011, March). Transition of students with disabilities to postsecondary education: A guide for high school educators.

U.S. Department of Education, Office of Special Education and Rehabilitative Services, & Office of Elementary and Secondary Education. (2025, January). Building and sustaining inclusive educational practices.

Vogel, M. (2024, January 3). Preparing students with disabilities for the transition to college. Edutopia.